



**Maajo 2026
Doorashada Xisbiga
Galalka Xogta
Codbixiyaasha Degmada
Multnomah
oo Soomaali ah**

Waxaa jirta labo qaab oo aad ku soo Celinayso Warqadaada Codbixinta

Ku soo celi Warqadaada Codbixinta boostada adoo adeegsanaaya boqshada boosto celinta lacagteeda horey loo baxshay marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada; ama Ku soo Celi Warqadaada Codbixinta Goobta Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ugu danbayn 8:00 fiidnimo Maalinta Doorashada Maajo 19, 2026.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah

Doorashada Xisbiga Maajo 19, 2026

Gudaha Xogta Codeynta Luuqadaha Badan

Muddada kama dambaysta ah ee is-diiwaangelinta codbixiyaha

Isdiiwaan geli si aad u codeyso ugu danbayn **Talaadada, Abriil 28, 2026**. Haddii loo baahdo, cusboonaysii xogtaada diiwaangelinta codbixiyaha ama iska diiwaan gali si aad uga codeyso barta OregonVotes.gov/MyVote

Saamaynta Dhismaha

goobaha sanduuqyada codbixinta rasmiga ah ee saamayn kasoo gaartay xiritaannada dhismaha maktabada ee doorashadaan.

Gudaha waxaa ka helaysaa xog dheeraad ah oo ku saabsan isbeddellada goobaha ee Goobta Codbixinta Rasmiga ah.

Macluumaad Doorasho oo la isku halayn karo

Xusuusnow: Siida ugu wanaagsan ee codbixiyeyaasha Degmada Multnomah ay ku heli karaan macluumaad doorasho oo la isku halayn karo waa inay booqdaan boggeena internetka ee MultnomahVotes.gov ama inay naga soo xiriiraan 503-988-VOTE (8683).

Dhismaha Doorashooyinka Degmada Multnomah Duniway-Lovejoy (Multnomah Duniway-Lovejoy Elections Building)

1040 SE Morrison Street, Portland, OR 97214

Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express)

(Ku dhex taala Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building))

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

600 NE 8th Street, Gresham, OR 97030

Furan Abriil 23 – Maajo 19, 2026



#MultnomahVotes

@MultCoElections

Taleefanka: 503-988-VOTE 800-735-2900 TTY

MultnomahVotes.gov elections@multco.us

MIYAAD U BAAHANTAHAY CAAWIMAAD SI AAD U CODEYSO?

La xiriiir Waaxda Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections)

Taleefanka: 503-988-VOTE (8683)

Adeegga Gudbinta Oregon (TTY): 711

FADLAN OGOOW: Waaxda Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) ayaa u daabacda xogta sida loogu soo diray. Annagu *ma* saxno higgaaadda, calaamadaha qoraalka, naxwaha, qaab-dhismeedka jumladaha, khaladaadka ama macluumaadka aan saxda ahayn.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Codbixiyaasha Degmada Multnomah ee Qaaliga ahaw:

Qaybtaan ka midka ah Buug-yaraha Cod-bixiyayaashaada waxaa bixisa Laanta Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections). Waxaa ku jira macluumaad ku saabsan musharixiinta iyo qodobada loo codeynaayo oo ka imanaya xaafadaha maxalliga ah ee ku jira xuduudaha Degmada. Joornaalka Gobolka (labada dhinac ee qaybtan oo leh qoraal cas qarka bogga) wuxuu xambaarsanyahay musharaxiinta heer federaal iyo mid goboleed.

Waa kuwaan dhawr waxyaalood oo ay tahay inaad ogaato:

- Lollanka musharixiinta ee Gobolka Multnomah iyo xilalka la doortay ee Magaalada Portland (City of Portland) kama soo muuqan doonaan warqadda codbixinta ee bisha Maajo 2026. Lollanka musharixiinta ee Gobolka Multnomah iyo xilalka la doortay ee Magaalada Portland kama soo muuqan doonaan warqadda codbixinta ee bisha Nofeembar 3, 2026, — marka codbixiyaasha Gobolka ay ku biirayaan codbixiyaasha Magaalada Portland (City of Portland) iyadoo la adeegsanayo codbixinta ku salaysan kala sarreysiinta musharaxiinta ee Gobolka Multnomah. Wakhtiga xaraysashada codsiyada Doorashada Guud ee Nofeembar 2026 waxay furmaysaa Juun 3, 2026. **Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan codbixinta ku salaysan kala sarreysiinta musharaxiinta, booqo multco.us/rcv.**
- **Afar goobood oo si rasmi ah looga rido codka oo ku yaalla maktabada ayaa saamaysay isbeddellada dhismaha ka socda maktabada iyo xiritaankeeda doorashadan. Goobahaan waxaa kamid ah: Maktabadda Belmont (Belmont Library), Maktabadda Gresham (Gresham Library), Maktabadda Northwest (Northwest Library), iyo Maktabadda St Johns (St Johns Library).** Haddii aad si joogto ah u booqato midkood goobahaan maktabada, waxaad booqan kartaa boggeena Goobaha Sanduuqyada Codbixinta Rasmiga ah oo 24-ka saac furan si aad u hesho faahfaahin dheeri ah oo ku aadan sida loo keeno warqadaada codbixinta midkood goobaheena cusub ee sanduuqa codbixinta rasmiga ah. **Si aad u hesho liiska goobaha rasmiga ah ee sanduuqa Codbixinta ee Degmada Multnomah, fadlan booqo websaydkeena: Multco.us/DropSites**
- **M&M Meel-dhaqista Baabuurta (M&M Carwash)/Shineemooyinka Regal (Regal Cinemas) (SE Division iyo 165th Ave.) mar dambe ma aha goobta rasmiga ah ee lagu rido warqadaha codbixinta (official ballot drop site).** Doorashooyinka ayaa ka shaqeynaya inay dejiyaan goobta dhigida waraaqaha cod-bixinta ee cusub xaafadan.
- Waxaad ka arki kartaa marxalada diiwaan gelintaada barta oregonvotes.gov/myvote. Halkaas ayaad ka cusboonaysiin kartaa diiwaangelintaada cod-bixinta ama aad kala socon kartaa codbixintaada. Mudada ay ku Eg Tahay Is Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha/Beddelidda Xisbigu waa Abriil 28, 2026.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- **Dhammaan cod-bixiyeyaashu waxay heli doonaan warqad codbixin ah oo ka kooban tartamo iyo qodobada loo codeynaayo aan xisbi gaar ah lahayn (haddii ay khuseyso). Haddii aad rabto inaad u codeyso musharaxiinta Xisbiga Dimuqraadiga (Democratic) ama Xisbiga Jamhuuriga (Republican) ee Doorashada Xisbiga ah ee bisha Maajo, waa inaad iska diiwaangelisaa mid ka mid ah xisbiyadaas marka la gaaro waqtiga kama dambaysta ah ee **Diiwaangelinta Codbixiyaha/Beddelka Xisbiga, Abriil 28, 2026.****
 - Waxaad ka dooran kartaa ama beddeli kartaa xisbigaaga adigoo cusboonaysiinaya macluumaadkaaga diiwaangelinta codbixiyayaasha khadka tooska ah (oo leh Aqoonsiga/Shatiga DMV ee Oregon mise afarta lambar ee ugu dambeeya Lambarkaaga Sooshal Sekuuritiga) barta oregonvotes.gov/myvote ama adigoo buuxinaya Kaarka Diiwaangelinta Cod-bixiyaha Oregon ee laga helaayo buug-yarahan ama maktabad kasta ama xafiiska boostada ee Degmada Multnomah. **Mudada ay ku Eg Tahay Is Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha/Beddelidda Xisbigu waa Abriil 28, 2026.**
 - Haddii aad beddesho xisbiga aad ka tirsan tahay marka lagu dhawaado wakhtiga kama dambaysta ah ee Abriil 28, 2026 waxaad heli kartaa laba warqadood oo codbixin ah. Codka labaad oo keliya u codee xisbigaaga cusub. Codbixinta ugu horreysa lama tirin doono.
 - Haddii aad ka diiwaangashan tahay Xisbiga Dimuqraadiga (Democratic) ama Xisbiga Jamhuuriga (Republican), waxaad sidoo kale heli doontaa warqad codbixin oo gaar ah oo loogu talagalay Wakiilka Guddiga Xaafadda. Musharixiinta guddiga xaafadda kama soo muuqdaan Galka Xogta Codbixiyaha. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan loollannadan waxaa laga heli karaa dhabarka warqadda codbixinta ee Wakiilka Guddiga Xaafadda (Precinct Committeeperson).
 - Waraaqaha codbixinta waxaa boostada lagu soo diri doonaa laga bilaabo Arbacada, Abriil 29. Haddii aadan helin warqadaada codbixinta ugu danbayn Khamiista, Maajo 7, 2026, fadlan wac 503-988-VOTE (8683) ama iimeyl u dir elections@multco.us.
- Si loo tiriyo, **warqadaha codbixinta la dhiibtay waa in la keenaa xafiiska doorashooyinka degmada ee Oregon ama Goobta Goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ugu danbayn 8:00 p.m., Talaadada, Maajo 19, 2026, ama waa in boostada lagu soo diraa ugu danbayn Talaadada, Maajo 19, 2026.**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waxaad kala xiriiri kartaa xafiiskeena lambarka 503-988-VOTE (8683).

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Daacadnimo,



Tim Scott, Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada Multnomah

FADLAN OGOOW: Waaxda Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) ayaa u daabacda xogta sida loogu soo diray. Ma saxno higgsaadda, calaamadaha qoraalka, naxwaha, qaab-dhismeedka jumladaha, khaladaadka ama macluumaadka aan saxda ahayn.



Qeexitaannada Doorashada

Doorashooyinka Xisbiga ayaa dhaca Talaadada saddexaad bisha Maajo sanadaha tiro dhabanka ah. Doorashada Talaadada, Maajo 19, 2026 waa Doorashada Horudhaca ee Guddoomiyaha Gobolka (Gubernatorial) waana doorasho hordhac ah oo codbixiyayaashu ay ku dooranayaan musharaxiinta xisbiga si ay ugu tartamaan xilal iyagoo matalaya xisbiyadooda doorashooyinka guud.

Sharci Loo Codeynaayo

Sharci la soo jeediyay oo ay qoreen dadka deegaanka oo lagu dhejiyay codbixinta si ay codbixiyayaashu u ansixiyaan ama u diidaan. Hindisayaasha codbixinta waxaa badanaa diyaariya koox dadka deegaanka ah oo xiiseeya arrin gaar ah.

Amaahyada

Amaahyadu waa waajibaad deymo ah oo ay soo saaraan maamullada si loo maalgeliyo mashaariicda horumarinta raasamaalka ee waaweyn. Sida deynta guryaha oo kale, waxaa loo isticmaalaa in lagu maalgeliyo wax iibsiga waaweyn waqti ka dib. Amaahyada guud ahaan waxaa lagu bixiyaa canshuurta guryaha. Saamaynta dhaqaale ee doorashada amaahda way kala duwanaa doontaa dadka deegaanka ilaa dadka degan iyadoo lagu saleynayo qiimaha hantida iyo tirada Bixinta Daynta Maalgashiga.

Doorashada Xisbiga ee Xiran

Oregon, codbixiyayaashu waa inay iska diiwaan geliyaan xisbiga ay doortaan ugu yaraan 21 maalmood ka hor doorashada. Codbixiyayaasha aan ka diiwaan gashanayn xisbi siyaasadeed oo weyn waxay helaan tartamo musharaxiin aan xisbi ahayn iyo qodobada loo cadeynaayo doorashooyinka hordhaca ah ee xisbiyada ee xiran.

Degmada laga soo Doorto Xubin Koongareeska kamid ah

waax-hoosaad siyaasadeed oo loogu talagalay doorashada wakiillada Mareykanka. Oregon hadda waxay leedahay lix degmo oo Kongareeska ah.

Canshuur (magac)

Ururin lagu soo rogay canshuuraha maxalliga ah ama kuwa gobolka, oo lagu ansixiyay cod-bixiyayaasha, taasoo noqon karta dib-u-cusboonaysiin canshuuraha jira ama kordhinta canshuurta iyada oo loo marayo canshuurta ikhtiyaariga ah ee maxalliga ah iyada oo loo marayo oggolaanshaha cod-bixiyayaasha.

Canshuur (fal)

In la qiimeeyo ama lagu soo rogo canshuur maxalli ah oo ka sarreysa qaddarka hadda jira muddo waqti ah iyadoo la raacayo oggolaanshaha codbixiyaha.

Qodob Loo Codeynaayo

Qodob loo codeynaayo waa mid kasta oo kamid ah kuwa soo socda oo loo gudbinaayo shacabka si ay ugu codeeyaan ama ugu diidaan doorasho: (a) Sharci lasoo jeediyay, (b) Sharci ama qayb kamid ah Sharciga Golaha Baarlamaanka, (c) dib u eegis ama wax kabadelka Dastuurka Oregon, (d) sharciga maxaliga ah, gaarka ah ama magaallada, (e) soo jeedin ama su'aal.

Wakiilka Guddiga Xaafadda (Precinct Committee Person, PCP)

Qof la doortay ama la magacaabay oo matalaya xisbi siyaasadeed oo weyn iyo codbixiyaal ku sugan xaafad.

Xaafad

Xaafadu waa qaybta ugu yar ee juqraafi ahaan loogu talagalay ujeedooyinka codbixinta. Degmada Multnomah waxay leedahay 107 xaafadood.

Boqshada Saxiixa

Cod-bixiyuhu wuxuu warqadda codbixinta ku ridaa baqshadda saxiixa, wuu saxiixaa, ka dibna wuxuu boostada ku soo celiyaa (oo lagu calaamadeeyay boostada maalinta doorashada ama ka hor) ama wuxuu warqadda codbixinta ku ridaa goob kasta oo rasmi ah oo lagu rido codbixinta oo ku taal Oregon maalinta doorashada. Xafiiska Doorashadu wuxuu xaqiijin doonaa saxiixa si loo hubiyo inuu la mid yahay saxiixa ku yaal kaarka diiwaangelinta codbixiyayaasha ee la bixiyay marka la iska diiwaan gelinayo codbixinta..

Qeexitaanno dheeraad ah waxaa laga heli karaa:

multco.us/info/election-definitions

Oregon.gov/languages/pages/glossary.aspx



Xaqiiqooyinka aad Ka Ogaanayso Codeynta iyo Doorashooyinka

Yaa isku diiwaan gelin kara si ay uga codeeyaan Oregon?

- Waa qasab inaad tahay muwaadin Mareykan ah.
- Waa inaad dagan tahay Oregon,
- Waa inaad jirtaa ugu yaraan 16 sano. Waxaad heli doontaa warqada koobaad ee codbixinta oo laguugu soo dirayao boostada marka aad jirto ugu yaraan 18 sano.

**Waa inaad isku diiwaan gelisaa inaad codeyso ugu yaraan 21 maalmood kahor
Maalinta Doorashada.**

Sidee ayaan iskugu diiwaan gelin karaa codbixinta?

- Barta oonlaynka ah oo ah oregonvotes.gov/register ama
- Kaarka Diiwaan Gelinta Codbixiyaha ee Oregon oo warqad ah kaasoo laga soo qaadan karo xafiiska doorashada, DMV, maktabada dadwaynaha, ama xafiiska boostada.

Sidee ayay codeynta lagu diro boostadu u shaqeysaa?

Dhammaan doorashooyinka Oregon waxaa qabta xafiiska doorashooyinka degmada. Xafiiska doorashooyinka ayaa warqadaha codbixinta boostada toos ugu dira codbixiyaasha. Codbixiyaasha ayaa buuxinaaya warqadahooda codbixinta, kadibna ku celinaaya xafiiska doorashooyinka ee degmada oo loogu dirayao boostada ama waxaa lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah.

Ku dir codbixinta boostada adoo raacaaya dhawr talaabo oo fudud:

- 1) Isku diiwaan gelinta Codbixinta
- 2) Hel Kaarka Ogeysiiska Codbixiyaha
- 3) Hel Galka Xogta Codbixiyaha

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- 4) Hel Warqadaada Codbixinta
- 5) Ku Codee Warqadaada Codbixinta
- 6) Soo celi Warqadaada Codbixinta

Sidee ayaan ugu codeynayaa warqadeyda codbixinta?

Radii jawaabta musharaxa ama qodobka loo codeynaayo (“YES” (HAA) ama “NO” (MAYA)) ee aad dooranayso. Gebi ahaanba khad madoow ku masax goobinta geeska bidix ee dookhaaga adoo adeegsanaaya khadda buluuga ah ama madoowga ah. Ha adeegsan qalin koobiyo.

Vote for One

Candidate 1

Candidate 2

OR Write-in on line above

Codadka Qorista Dookha

Si aad u qorto codka musharax aan ku jirin liiska warqada codbixinta, si buuxda u calaamadi goobinta geeska bidix ee laynka loo sameeyay xafiiska loo tartamaayo kadibna ku qor magaca buuxa ee musharaxa laynkaas.

Vote for One

Candidate 1

Candidate 2

Candidate 3
OR Write-in on line above

- Xaqiiji inaad si sax ah u calaamadisay dookhaaga tartan kasta.
- Warqadaada codbixinta rasmiga ah ayay ku qornaan karaan tartannada daabacan labada dhinaca.
- Ku rid warqadda codbixinta boqshada soo celinta ee aqoonsiga leh.
- Akhri Bayaanka Codbixiyaha oo ku qoran boqshada soo celinta kadibna saxiix godka saxiixa.
- **Warqadaada codbixinta lama tirin doono haddii aadan saxiixin boqshada soo celinta.**
- Saxiix kasta waxaa loo eegayaa saxiixa diiwaan gelinta ee ku qoran galka. Saxiixyadu waa inay iswaafaqaan si warqada codbixinta loo tiriyo.


Haddii aad u codeyso musharixiin ka badan inta loo ogol yahay xafiis ama haddii aad ku codeyso **labadaba Yes (Haa) iyo No (Maya)** qodobka loo codeynaayo, waxaa la yiraahdaa codbixin xadkeedii dhaaftay **codkaagana lama tirin doono** tartankaas.

Haddii aad khalad samayso ama aad badesho fikirkaaga inta aad calaamadinayso warqadaada codbixinta.

- Adiga ayaa sixi kara. Arag tusaalaha hoose.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- **Ka dhig dookhaaga mid si cad loo** fahmaayo si ujeedadaada loo fahmo codkaagana loo tiriyo si sax ah.



- Haddii aadan awoodin inaad saxdo warqadaada codbixinta, waxaad codsan kartaa warqadda codbixinta oo badel ah oo aad ka helayso xafiiska doorashooyinka

Soo celi Warqadaada Codbixinta



Noogu soo dir warqaddaada codbixinta adigoo adeegsanaya Boostada Mareykanka (U.S. Mail). Waa inaad boostada kusoo dirtaa marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada Maajo 19, 2026. Ku soo dirista boostadu qasab maaha.



Ku rid warqadaada codbixinta midkood goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee Oregon ugu danbayn 8:00 p.m. marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada Maajo 19, 2026.

Goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo furan 24 saac

Portland

North

- **Rose Quarter** – Sanduuqa Lagu rido Waraaqda Codbixinta ee Rasmiga ah wuxuu ku yaal dhinaca koonfureed ee Rose Quarter, agagaarka isha ka burqanayso biyo iyo calaamada Rip City – Inta lagu jiro saacadaha shaqada caadiga ah, baarkin bilaash ah oo aan ka badnayn 15 daqiiqo ayaa laga heli karaa aagga baarkinka Annex ee ku yaalla N Drexler Dr oo ku yaalla meesha looga leexdo Interstate Ave.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

(Baarkin lama heli karo inta lagu jiro xiliga xafladaha Rose Quarter.) **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**

- **Dugsiga Hoose ee James John (James John Elementary School)** – 8315 N Lombard St. - Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo yaala geeska wadada ee cirifta waqooyi-galbeed ee N Lombard St. iyo Charleston Ave. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabada Kenton (Kenton Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 8226 N Denver Ave.
- **McDonald's ee Waqooyiga Lombard (North Lombard McDonald's)** - 3011 N Lombard St. - Sanduuqa Rasmiga ah ee Lagu Rido Codbixinta (Official Ballot Drop Box) wuxuu ku yaal dhinaca lugeynta - **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabadda North Portland (North Portland Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 512 N Killingsworth St.
- **Beerta McCoy (McCoy Park)** – oo ku taala geeska koonfur bari ee Beerta McCoy (McCoy Park) oo u dhow isgoyska N Trenton St. iyo Newman Ave. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**

Northeast

- **Maktabadda Albina (Albina Library)** - 205 NE Russell St. - Goobta Rasmiga ah ee Lagu Rido Codbixinta waxay ku taallaa agta jeexka lagu celiyo buugaagta ee dhinaca koonfureed ee dhismaha, meel u dhow baarkinka baaskiillada.
- **Maktabada Gregory Heights (Gregory Heights Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 7921 NE Sandy Blvd.
- **Maktabada Hollywood (Hollywood Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 4040 NE Tillamook St.
- **Maqaayada McDonald (McDonald's Restaurant)** – 2010 NE Cesar Chavez Blvd. – Sanduuqa codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska galbeed ee NE 40th Ave. inta u dhexaysa NE Tillamook St. iyo Hancock St. iyo aaga Maktabada Hollywood (Hollywood Library).
- **Xaafada Parkrose (Parkrose Neighborhood)** – 4390 NE 102nd Ave. – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala aaga baakinka bariga ee wadada ka timaada Xarunta Seeraha MHCC Maywood (MHCC Maywood Park Center) oo marta NE 102nd Ave. iyo Prescott St.

Northwest

- **Maktabada Northwest (Northwest Library)** – CIWAANKA CUSUB - 2030 NW Pettygrove St. – Sanduuqa Codka lagu rido ee Rasmiga ahwuxuu yalaa dhanka midig ee aaga la dhigo buugaagta maktabada.

Southeast

- **Waaxda Doorashooyinka ee Multnomah (Multnomah County Elections)** – 1040 SE Morrison St.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- o **SE 11th Avenue** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska bari ee SE 11th Ave. inta u dhexaysa SE Morrison St. iyo SE Belmont St.
- o **SE Belmont Street** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska waqooyi ee SE Belmont St. inta u dhexaysa SE 10th Ave. iyo SE 11th Ave.
- o **1040 SE Morrison Street** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee Lugta lagu tagaayo/Baaskiilka lagu geli karo ayaa ku yaala aaga geeska SE 11th Ave. iyo SE Morrison St.
- **Qaadashada Buugaagta Hawthorne (Hawthorne Holds Pickup)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 3557 SE Hawthorne Blvd. – Codbixiyeyaashu waxay isticmaali karaan sanduuqa buugaagta iyo sanduuqa codbixinta gudaha ah.
- **Maktabada Holgate (Holgate Library)** –7905 SE Holgate Blvd. – Sanduuqa Codaynta ee Rasmiga ah wuxuu dhinaca bidix ka xigaa maktabadda aan xiriirka lahayn ee dhinaca bidix ee dhismaha, ee u dhow qaybta baarkinka. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabada Midland (Midland Library)** - 805 SE 122nd Ave.– Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee Rasmiga ah ayaa ku xiga booska soo celinta buugga ee dhinaca koonfureed ee dhismaha. Waxaa waraaqaha codbixinta sidoo kale lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee yaala qaybta barakinka ee maktabadda.
- **Suuqa Portland (Portland Mercado)** - 7238 SE Foster Rd. - Goobta Rasmiga ah ee Lagu Rido Codbixinta (Official Ballot Drop Site) waxay ku taallaa fagaaraha Suuqa Portland (Portland Mercado) ee ku yaal SE Foster Rd. iyo 72nd Ave. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabada Rockwood (Rockwood Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 17917 SE Stark St.
- **Maktabada Sellwood – Moreland (Sellwood – Moreland Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 7860 SE 13th Ave.
- **Maktabada Woodstock (Woodstock Library)** (Aaga Buugaagta la keeno ee Maktabada) – 6008 SE 49th Ave.

Southwest

- **Qalabka A-Boy (A-Boy Supply)**– 7365 SW Barbur Blvd.
- **Maktabada Capitol Hill (Capitol Hill Library)** (Aaga Buugaagta la keeno ee Maktabada) – 10723 SW Capitol Hwy.
- **Maktabada Central (Central Library)** – (Aaga Buugaagta la keeno ee Maktabada) – 801 SW 10th Ave. – Warqadaha codbixinta ayaa lagu ridi karaa aaga buugaagta la keeno ee **baabuurta lagu geli karo** oo ku taala SW 11th Ave. inta u dhexaysa SW Yamhill St. iyo Taylor St.
- **Maktabada Hillsdale (Hillsdale Library)** (Aaga Buugaagta la keeno ee Maktabada) – 1525 SW Sunset Blvd.
- **Barxadda Pioneer Courthouse (Pioneer Courthouse Square)** – 700 block of



Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

SW Broadway (oo ku dhagan Starbucks kuna taala dhanka Nordstrom) – **Lug Keliya ayaa lagu geli karaa.**

Fairview

- **Maktabadda Fairview - Columbia (Fairview - Columbia Library)** (Aaga Buugaagta la keeno ee Maktabadda) - 1520 NE Village St.

Gresham

- **Maktabaddii Hore ee Gresham (Gresham Library)** - 385 NW Miller Ave. Sanduuqa Rasmiga ah ee Lagu Rido Codbixinta ee **baabuurta lagu geli karo** wuxuu ku yaal goobta baarkinka.
- **Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express) – Saacadaha Kooban** – Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building), 600 NE 8th St. – Waxaa jira Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo yaala gudaha Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express) oo ku taala dabaqa koobaad ee Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building). Waxay furan tahay keliya inta lagu jiro saacadaha xarunta codbixintu furan tahay. Waxaad u baahan doontaa inaad baakinka gaariga dhigato aadna lugayso si aad ugu rido warqadaada codbixinta.

Troutdale

- **Maktabada Troutdale (Troutdale Library)** – (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 2451 SW Cherry Park Rd.



Isbadellada Goobta ee Goobta Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah

Afartan goobood ee soo socda ee Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah yaalla ayaa saamayn kasoo gaartay isbeddelada iyo xiritaannada maktabada. Si aad u hesho xogta xiritaanka Maktabada Degmada Multnomah (Multnomah County Library) booqo: MultCoLib.org/library-construction-closures. Si aad u hesho liiska Goobaha Sanduuqa Codbixinta ee Degmada Multnomah booqo: Multco.us/DropSites.

North Portland

Maktabada St. Johns (St. Johns Library) – 7510 N Charleston Ave.
Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Haddii aad adeegsato Maktabada St. Johns (St. Johns Library) si aad u gayso warqadaada codbixinta, fadlan ogoow: sanduuqa codbixinta rasmiga ah ee kuugu dhow wuxuu ku yaalaa geeska wadada ee Dugsiga Hoose ee James John (James John Elementary School) (8315 N Lombard St.) ee geeska waqooyi-galbeed ee N Lombard St. iyo N Charleston Ave. Kani waa sanduuqa cod-bixinta ee lagu yimaado lug.

Northwest Portland

Maktabada Northwest (Northwest Library) – Ciwaankii hore – 2300 NW Thurman St.

Haddii aad codkaaga ka ridaysay Maktabadda Northwest (Northwest Library), fadlan ogow: ciwaanka maktabaddan wuu isbeddelay tan iyo doorashadii hore. **Maktabadda CUSUB ee Northwest (Northwest library) waxay ku taallaa 2030 NW Pettygrove St.**

Southeast Portland

Maktabada Belmont (Belmont Library) – 1038 SE César E Chávez Blvd.
Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Haddii aad u adeegsanayso Maktabadda Belmont (Belmont Library) si aad u keento waraaqdaada cod-bixinta, fadlan ogow: sanduuqa cod-bixinta rasmiga ee kuugu dhow wuxuu yaal gudaha Qaadashada Buugaagta Hawthorne (Hawthorne Holds Pickup) (3557 SE Hawthorne Blvd.) Codbixiyaasha ayaa adeegsan kara aaga buug dhigista iyo

sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee gudaha.

Gresham

Maktabada Gresham (Gresham Library) – 385 NW Miller Ave.

Maktabada waa la xiray; si joogta ah ayaa loo rarayaa.

Haddii aad u isticmaasho Maktabada Gresham (Gresham Library) si aad ugu dhiibto codkaaga, fadlan ogow: Maktabadda Gresham (Gresham Library) way xiran tahay iyadoo loo diyaar-garoobayo furitaanka Maktabadda CUSUB ee East County (East County Library) **laakiin weli waxaad isticmaali kartaa Sanduuqa Rasmiga ah ee Lagu Rido Codbixinta ee baabuurta lagu geli karo ee ku yaal goobta baarkinka.**

Sameyso qorshe aad ku codaysid!

Doorashooyinka Ismaamulka Multnomah (Multnomah County Elections) waxay rabaan in dhammaan cod-bixiyayaashu awoodaan inay codeeyaan oo ay ogaadaan cida la weydiisto caawimo. Kooxda Caawimada Cod-bixiyaha (Voter Assistance Team VAT) ayaa ka caawisa cod-bixiyayaasha naafada ah iyo cod-bixiyayaasha su'aalaha kale.

Yaa kusiin kara caawimo adiga si aad:

- Iskugu diiwaangalisid inaad codaysid ama hubisid diiwaangalintaada cod-bixinta.
- Calaamadi ama akhri warqadaada cod-bixinta.
- Cusbooneysii ama xaqiiji magacaaga, ciwaankaaga ama macluumaad kale ee codbixinta.
- Fahan shuruucda iyo tallaabooyinka doorashada ee cod-bixinta.

Adeegyadani markasta waa bilaash.

Waxbadan ka oggow ikhtiyaarada cod-bixinta aan saacidnay iyo kuwa madaxbanaan ee [MultnomahVotes.gov](https://www.multnomahvotes.gov)

Nagalsoo xidhiidh adoo soo wacaya, iimayl u diraya ma foomkeena onlaaynka:
503.988.VOTE (8683) • elections@multco.us

Onlayn:

[Multco.us/VATForm](https://www.multco.us/VATForm)

Waxa ay tahay inaad sameysid si aad u diyaarisid ama qorsheysid inaad Codeysid

- Muddee wakhti aad tixgalisid xogta warqada cod bixinta.
- Ku xidhnow dadka si aad ugala hadashid arrimaha.
- Ka samee cilmi-baadhistaada websaydka, telefishanka, raadhiyowga, ama jaraa'idda.
- Sii wakhti aad ku fiirisid codkaaga.

Turjumaadaha luuqada, booqo [MultnomahVotes.gov](https://www.multnomahvotes.gov) oo u dhaadhac dhanka hoose.

Qodob Loo Codeynayo 26-261 Waxaa Dadweynaha usoo bandhigay Guddiga Komishanarrada Degmada

Canshuur shan sanno ah: Maktabadda, Matxafka, iyo barnaamijyada waxbarashada ee Ururka Taariikhda Oregon (Oregon Historical Society).

SU'AAL:

Miyey kula habboon tahay in Degmadu markale dardargeliyo canshuur soconaysa 5 sano oo lagu taageerayo matxafka sooyaallada, maktabadda, iyo barnaamijyada waxbarashada; iyadoo la sii wadaayo in laga qaado \$0.05 \$1,000-kiiba qiimaha guud ee hanti walbo, isla markaana iyadoo aan meesha ka maqanayn kormeer joogta waxaana loo maddalsanyahay inay bilaabato 2026? Aftidan waxay cusboonaysiinaysaa cashuuraha ikhtiyaariga ah ee maxaliga ah ee hadda la qaado.

DULUCDA/GUUDMARKA:

Sanadkii 2021, codbixiyayaashu waxay ansixiyeen canshuur ikhtiyaar maxalli ah oo soconaysa 5 sano oo ah \$0.05 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida, si loo taageero Ururka Taariikhda iyo Sooyaallada ee Gobolka Oregon (Oregon Historical Society, OHS). Cusboonaysiinta canshuurtan waxay sii wadi doontaa taageerada matxafka, maktabadda, iyo barnaamijyada waxbarashada ee OHS, waxayna sidoo kale maalgelin doontaa waxyaabaha soo socda iyadoo aan la kordhin canshuurta:

Barnaamijyada Waxbarashada;

Gelitaanka bilaashka ah ee kooxaha dugsiyada iyo dadka deggan Degmada Multnomah;

Xafidista/Dhawrista sooyaallada, shayaha qadiimiga ah, hadaha iyo dhaqanka ee muhiimka ah ee Gobolka Oregon.

Taageeridda afar urur oo ku hawlan sooyallada isla markaana ka shaqaysa Degmada: Ururka Taariikhda Gobolka Bari (East County Historical Organization), Ururka Taariikhda Gresham (Gresham Historical Society), Ururka Taariikhda Troutdale (Troutdale Historical Society), iyo Ururka Taariikhda Crown Point Country (Crown Point Country Historical Society);

OHS waxay sii wadi doontaa inay sii xoojiso dadaalkeeda si ay u bixiso bandhigyo iyo adeegyo ka tarjumaya sooyaallaha kala duwan ee gobolkeena, isla markaana ay ku lug yeelato dhammaan qaybaha degmada.

Cadadka canshuurtu waxay sii ahaanaysaa \$0.05 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida ay ku qiimeysantahay, waxayna beddelaysaa canshuurtii 2021. Guri ku qiimeysan (qiimahiisu yahay) \$250,000 waxaa laga qadayaa \$12.50 sanadkii.

Guddi kormeer oo madax-bannaan oo muwaadiniin ah ayaa dib u eegi doona kharashaadka si loo xaqiijiyo in lacagaha loo isticmaalay sidii ay codbixiyayaashu u ansixiyeen. Isla-xisaabtan sannadle ah ayaa la samayn doonaa, waxaana la shaacin



Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

doonaa natiijooyinka.

Canshuurta waxay soo saari doontaa qiyaastii \$3.88 milyan sannad maaliyadeedka 2026-2027; \$4.00 milyan sannad maaliyadeedka 2027-2028; \$4.12 milyan sannad maaliyadeedka 2028-2029; \$4.24 milyan sannad maaliyadeedka 2029-2030; iyo \$4.37 milyan sannad maaliyadeedka 2030-2031.

Lacagaha la qiyaasay ee aftidan KALIYA WAA KUWO QIYAAS AH iyadoo lagu saleeyey macluumaadka ugu wanaagsan uu heli karay xisaabiyaha degmada, xiliga uu sameynaayey qiyaasta.

Bayaanka Sharaxaada ah:

Tan iyo markii la aasaasay 1898-kii, Ururka Taariikhda Oregon (Oregon Historical Society, OHS) wuxuu maamulaa matxaf iyo maktabad cilmi-baariseed dadweyne oo ku taalla bartamaha Portland, wuxuuna ilaaliyaa ururinta ugu weyn ee agabka taariikhiga ah ee ku saabsan gobolka Oregon, isaga oo bixiyaa barnaamijyo ku saabsan dadka, meelaha, iyo dhacdooyinka qaabeeyey Oregon. Intaa waxaa dheer, OHS waa ururka sooyaallada ugu weyn ee Degmada Multnomah, isagoo haya sawirro, khariidado, qoraallo, buugaag, filimaan, iyo cajalado duuban ka warbixinaaya taariikhda Degmada.

Sannad walba, qiyaastii dad dhan 40,000 ayaa booqda xarumaha OHS ee ku yalla Portland, oo ay ku jiraan ku dhawaad 5,000 arday iskool iyo jaamacado ka socda. Matxafka OHS wuxuu leeyahay saddex waxyaabood oo si joogto ah loo soo bandhigo iyo kuwo la bedbeddello oo dhammaantooda ka hadlaya mawduucyo kala duwan. Sannadka 2024, OHS wuxuu daahfuray xarunta *Rivers, Roses, and Rip City*, oo ah xarunta sooyaallada oo loo gaaryeelay in lagu xafido waxyaabaha qadiimiga ah ee magaalada Portland. Bandhigga qotada dheer, ee lagu rakibay Hoolka Qoyska ee Naito ee OHS, wuxuu sahayiyaa muuqaalka gaarka ah ee magaalada iyo bulshooyinka iyo dadka ka qayb qaata aqoonsigeeda firfircoon. Sidoo kale, OHS wuxuu daabacaa joornaalka dib-u-eegista aqooneed ee ugu muddada dheer Galbeedka, *Wargeyska Taariikhda Oregon*, kaas oo taageera cilmi-baaris cusub, xoojiya aqoonta iyo aragtiyaha, isla markaana kiciya wada-hadallo khuseeya taariikhda.

Khayraadka onlaynka ah ee OHS ee ohs.org waxay siiyaan ardayda iyo bartayaasha da' kasta leh agab waxbarasho oo bilaash ah. Sanadka 2024, ururku wuxuu diiwaangeliyay in ka badan 1.3 milyan oo booqde oo galay ururintiisa onlaynka ah, iyadoo in ka badan 20% booqdayaashu ay ka yimaadeen Degmada Multnomah. OHS waxay qorsheyneysaa inay soo bandhigto websayd cusub oo hal-abuur leh xilliga gu'ga 2026, kaas oo gabi ahaanba u heellan inuu soo gudbiyo taariikhda iyo sooyaallada Portland iyada oo la adeegsanayo agabka dijitaalka ah iyo tignoolajiyada hal-abuurka leh.

Lacagaha laga helo canshuurta la cusbooneysiisay waxay dibbiri doontaa saacadaha adeegga hadda ee OHS ee loogu talagalay dadweynaha, oo ah 47 saacadood toddobaadkii matxafka iyo 32 saacadood todobaadkii maktabadda cilmi-baarista; waxay taageeri doontaa ilaalinta iyo diyaarinta bandhigyada hadda jira; waxay maalgelin



Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

doontaa horumarinta barnaamijyo waxbarasho cusub iyo deeqo waxbarasho; waxayna u oggolaan doontaa OHS inay sii waddo bixinta aqbalaadda adeegsiga bilaashka ah ee matxafka iyo dalxiisyada dhammaan dadka deggan Degmada Multnomah iyo kooxaha ardayda K–12. Lacagaha canshuurta waxay sidoo kale taageeri doonaan hawlaha afar urur taariikheed oo ku yaal Bariga Degmada Multnomah (East Multnomah County historical societies) — Ururka Taariikhda Gobolka Bari (East County Historical Organization, ECHO), Ururka Taariikhda Gresham (Gresham Historical Society), Ururka Taariikhda Troutdale (Troutdale Historical Society), iyo Ururka Taariikhda Crown Point Country (Crown Point Country Historical Society).

Kharashka cusbooneysiinta canshuurta wuxuu ahaan doonaa \$0.05 (shan senti) halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay, laga bilaabo 2026 ilaa 2031. Tusaale ahaan, milkiilaha guri ay degmada ku qiimeysay \$250,000 wuxuu sii wadi doonaa inuu bixiyo \$12.50 sanadkii canshuurtan.

Isla-xisaabtanka ayaa laf-dhabar u ah canshuurtan, iyadoo Guddoomiyaha Degmada Multnomah uu sii wadi doono magacaabidda guddi madax-bannaan oo kormeera arrimaha canshuurta — kaas oo matalaya bulshooyinka kala duwan ee ku dhaqan Degmada Multnomah — si loo eego dhammaan kharashyada canshuurta. Guddiga Kormeerka Canshuurta wuxuu xaqiijin doonaa in lacagaha loo kharash-gareeyo si waafaqsan hadba siday codbixiyayaasha u ansixiyeen, wuxuuna la talin doonaa OHS si loo hubiyo in guddigeeda, shuraakadeeda, shaqaalaha eeda, xarumaheeda, iyo barnaamijyadeeda ay si firfircoon u matalaan dhaqamada kala duwan ee Degmada Multnomah. Intaa waxaa dheer, Degmada Multnomah waxay sii wadi doontaa inay doorato kormeeraha xisaabaadka, kaas oo ay mushahar siin doonto OHS, si uu u sameeyo kormeer sannadle ah lacagaha canshuurta, kuwaas oo loo soo bandhigi doono dadweynaha.

Canshuurtan waxay maalgelin doontaa ku dhawaad saddex meelood meel hawlaha ay fulinayso OHS. Lacagaha kale waxay ka yimadaan deeqo, tabarucaadka ganacsiyada iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay, lacagaha isdiwaangelinta, iyo dakhliga kale ee la kasbado.

(Macluumaadkaan waxaa bixiyay: Eric Arellano, Agaasimaha Maaliyadda, Degmada Multnomah)

Qodob Loo Codeynaayo 3-635 Magaalada Lake Oswego (City of Lake Oswego)

Maalgelinta dib-u-dhiska Saldhigga Dab-damiska ee South Shore (South Shore Fire Station) si loo hagaajiyo badbaadada bulshada

SU'AAL:

Ma oggolaanaysaa in Lake Oswego ay dib u dhiso Saldhigga Dab-damiska ee South Shore (South Shore Fire Station) si loo hagaajiyo badbaadada bulshada iyadoo la soo saarayo debaajiyo dhan \$20.6 milyan?

DULUCDA/GUUDMARKA:

Haddii la ansixiyo, qodobkan loo codeynaayo wuxuu oggolaanayaa soo saarista debaajiyada waajibaadka guud si loo dumiyo Saldhigga Dab-damiska ee South Shore (South Shore Fire Station) ee hadda jira (la dhisay 1971) loona dhiso saldhig beddelkiisa ah.

Saldhig cusub ayaa casriyeyn doona dhismaha si uu wakhtiyada gurmada u soo gaabiyo, u bixiyo badbaadada la cusboonaysiiyay ee shaqaalaha dab-demiska, una buuxiyo heerarka seismic.

Guddi-hawleed ayaa qiimeeyey doorashooyin kale, oo ay ku jiraan dayactirka joogtada ah iyo xidhitaanka saldhigga, waxayna ku taliyeen in dib loo dhiso saldhigga. Xeerarka dhismaha ee maanta iyo sharciyada deegaanka ayaa dib-u-qaabaynta ka dhigaya mid ka qaalisan dhismaha cusub. Intaa waxaa dheer, waa in dib loo dhiso qolalka shaqaalaha maadaama aan la xoojin karin si ay ula jaanqaadaan heerarka seismic ee maanta ee xarumaha muhiimka ah, taasoo ka dhigeysa shaqaalaha dab-demiska iyo bulshada inay u nuglaadaan dhulgariir.

Haddii qodobkan loo codeynaayo la diido, saldhigga hadda jira wuxuu sii ahaan doonaa mid shaqaynaya inta uu ammaan u yahay isticmaalka, laakiin waxay u badan tahay in mustaqbalka la xidho.

Debaajiga waxaa lagu qiyaasay inay ku kacayso \$0.19 calaa \$1,000 kasta qiimaha hantida la qiimeeyay sannadkii. Qiimeyaasha dhabta ahi way kala duwanaa karaan iyadoo lagu salaynayo heerka dulsaarta iyo isbeddelada qiimaha la qiimeeyay.

Bayaanka Sharaxaada ah

Asalka Saldhigga Dab-damiska ee South Shore (South Shore Fire Station)

Waxaa la dhisay 1971, Saldhigga Dab-damiska ee South Shore (South Shore Fire Station), oo ku yaal 1880 South Shore Boulevard, waa kii ugu da'da weynaa afarta saldhig dab-damis ee Lake Oswego. Iyadoo saldhiggu inta badan u adeego qaybta koonfur-bari — oo ay ku jiraan Dugsiga Sare ee Lakeridge (Lakeridge High School), Dugsiga Hoose ee Hallinan (Hallinan Elementary School), Beerta Luscher (Luscher Farm), Xarunta Madadaalada iyo Dabaasha ee Lake Oswego (Lake Oswego



Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Recreation and Aquatic Center), Mary's Woods, iyo Bulshada Hawlgabka ee Stafford (Stafford Retirement Community). Saldhigga Dab-damiska ee South Shore (South Shore Fire Station) wuxuu u shaqeeyaa qayb ka mid ah nidaamka jawaabta degdegga ah ee magaalada oo dhan. Shaqaalaha, gaadiidka, iyo qalabka ka hawlgala saldhigga ayaa ka jawaaba dhacdooyinka halista ah iyo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka guud ahaan bulshada Lake Oswego.

Cilladaha Xarunta iyo Badbaadada Dhulgariirka

Guddi-hawleed bulsho oo uu magacaabay Golaha Magaalada ayaa qiimeeyay xarunta, wuxuuna go'aamiyay in Saldhigga Dab-damiska ee South Shore (South Shore Fire Station) uu gaaray dhammaadka cimrigiisii faa'iidada lahaa. Dhismuhu ma buuxinayo heerarka seismic ee hadda jira ee xarumaha danta guud ee muhiimka ah sida sandhigyada dab-damiska, dugsiyada, ama isbitaallada. Gudi-Hawleedku waxay ogaadeen in qolalka shaqaalaha ee hadda jira aan la xoojin karin si ay ula jaanqaadaan heerarka seismic ee xarunta muhiimka ah. Kadib markii ay qiimeeyeen dookhyada kale, Gudi-Hawleedku waxay go'aamiyeen in dayactirka qaab-dhismeedka jira aanay ahayn mid dhaqaale ahaan macquul ah marka la barbar dhigo kharashka lagu dhiso dhismaha cusub oo iska difaaci kara dhulgariir.

Horumarinta Caafimaadka iyo Shaqada

Haddii la ansixiyo, qodobkan loo codeynaayo wuxuu maalgelin doonaa dhismaha xarun cusub oo loogu talagalay inay ku jiraan:

- **Aaga jeermis dilista:** Meelo gaar ah oo loogu talagalay in lagu yareeyo soo-gaadhista shaqaalaha dab-demiska walxaha kansarka sababa ee sida caadiga ah lala kulmo marka lala dagaallamayo dabka.
- **Dekadda Gaariyaasha ee Casriga ah:** Bakhaarka la balaadhshay si loogu xareeyo baabuurta gurmada degdega ah ee casriga ah iyo qalabka sida doonta gurmada badda iyo baabuurta xamuulka ah ee loo isticmaalo gurmada dabka kaymaha ee aan ku haboonayn qaabka hadda jira ee 1971.
- **Diyaar Garoowga Hawlgabka:** Xarunta loogu talagalay in lagu ilaaliyo yoolalka gurmada degdegga ah ee hadda ee magaalada, oo uu ku jiro yoolka lagu gaaro 90% wicitaannada mudnaanta sare leh 8 daqiiqo ama ka yar gudahood.

Qodobka Loo Codeynaayo ee La Soo Jeediyay iyo Saamaynta Maaliyadeed

Kadib qiimeynta dookhyada kale, oo ay ku jiraan dib-u-dayactirka iyo xidhitaanka Saldhigga South Shore (South Shore Station), Guddiga Hawl-wadeenku wuxuu ku taliyay beddel buuxa oo lagu maalgelinayo debaajiyada waajibaadka guud sababtoo ah xeerarka dhismaha iyo qawaaniinta deegaanka ee hadda jira ayaa ka dhigaya dib-u-habaynta agabkii 1970-meeyadii mid ka qaalisan dhismaha cusub. Golaha Magaalada ayaa dib u eegay talooyinka Guddiga Hawl-wadeenka wuxuuna u gudbiyay qodobkan loo codeynaayo si codbixiyayaashu u tixgeliyaan.

Qodob Loo Codeynaayo 3-635 wuxuu oggolaanayaa soo saarista ilaa \$20.6 milyan oo debaajiyada waajibaadka guud ah si loo dumiyoo dhismaha jira loona dhiso saldhig cusub goobta hadda jirta.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Debaajiga waxaa lagu qiyaasay inuu ugu kacaayo milkiilayaasha guryaha qiyaastii \$0.19 calaa \$1,000 kasta qiimaha guriga lagu qiimeeyay sannadkii. Guriga qiimihiisu yahay \$600,000, waxa lagu qiyaasaa in kharashka sannadlaha ahi yahay \$114.

Haddii qodobkan loo codeynaayo la diido, \$20.6 milyan oo debaajiyo ah lama soo saari doono, canshuurta hantidana lama rogi doono. Saldhigga hadda jira waxa uu sii shaqayn doonaa oo keliya ilaa inta loo arko in ay ammaan tahay isticmaalkiisu, laakiin lama cusboonaysiin doono si uu ula jaanqaado heerarka seismic-ka casriga ah, caafimaadka, ama badbaadada.

(Macluumaadkaan waxaa bixiyay: Laura Hawkins, Diiwaan-hayaha Magaalada/Sarkaalka Doorashooyinka Magaalada, Magaalada Lake Oswego (City of Lake Oswego))



Qodob Loo Codeynayo 26-263 Degmada Dugsiyada Riverdale 51J (Riverdale School District 51J)

Canshuur maxalli ah oo shan sano ah oo dadku afti ku ansixinayaan, lacagtaasna loo isticmaali doono hawlaha iyo adeegyada degmada Riverdale.

SU'AAL:

Degmada Dugsiyada Riverdale ma soo rogi doontaa canshuur dhan \$1.67 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay si loogu maalgeliyo hawlaha muddo shan sano ah, laga bilaabo sannad-maaliyadeedka 2026-27? Aftidan waxay sababi kartaa in cashuurta hantidu ay sare u kacdo in ka badan boqolkiiba saddex.

DULUCDA/GUUDMARKA:

Tan iyo 2000, codbixiyayaashu waxay ansixiyeen canshuur maxalli ah oo ikhtiyaari ah si loo taageero hawlaha Degmada Dugsiyada Riverdale 51J (Riverdale School District 51J). Aftidan waxay u oggolaanaysaa Degmada inay soo rogo canshuur hantiyeed oo dhan \$1.67 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay sanad walba muddo shan sano ah si ay uga caawiso maalgelinta hawlaha degmada. Aftidani waxay sare u qaadaysaa canshuurta aftida loo qaaday ee degmada ee hadda jirta oo dhan \$1.37 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay.

Canshuurta aftida loo qaaday ee maxalliga ah waxay bixisaa maalgelin si loo sii hayo macallimiinta loona taageero barnaamijyada waxbarasho ee lagu bixiyo Riverdale. Haddii la ansixiyo/baasmariyo, Aftidan waxay bixin doontaa maalgelin dheeraad ah si loo taageero barnaamijyada waxbarashada ee Riverdale, shaqaale qorista, iyo hawlaha guud ee degmada. Haddii aan la ansixin, Degmadu waxay u baahan doontaa inay yareyso miisaaniyaddeeda 2026-27 in ka badan \$1,000,000, taas oo lagu qiyaasay inay u dhiganto in shaqada laga joojiyo toddobo macallin ama iskoolka uusan shaqayn muddo 21 maalmood ah.

Cadadka lacagaha canshuurta ee \$1.67 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay wuxuu u dhigmaa qiyaastii \$167 sanadkii halkii \$100,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay, taasoo ah koror dhan \$30 sanadkii halkii \$100,000 ee qiimaha hantida guud lagu qiimeeyay marka lala barbardhigo canshuurta hadda la qaado.

Canshuurta afida loo qaaday isla markaana maxalliga ah waxaa lagu qiyaasayaa inay soo uruuriso lacag dhan \$7,530,900 muddo shan sanno ah:

\$1,418,300 sannadka 2026-2027

\$1,461,000 sannadka 2027-2028

\$1,505,400 sannadka 2028-2029

\$1,550,000 sannadka 2029-2030



\$1,596,200 sannadka 2030-2031

Bayaanka Sharaxaada ah:

Waa maxay canshuurta afida loo qaadaayo isla markaana maxalliga ah?

Canshuurta loo qaaday aftiga isla markaana maxalliga ah ee degmada oo hadda jirta waxay dhammanaysaa Juun 30, 2026. Haddii aan codbixiyayaashu ansixin, canshuurta way dhammaan doontaa, maalgelintuna waxay hoos u dhici doontaa ilaa eber. Aftidan waxay dejin doontaa canshuur shan sano ah oo ah \$1.67 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay, taasoo beddelaysa canshuurta wakhtigeeda sii dhammanaya. Dhammaan lacagaha la ururiyo waxay ku hadhi doonaan Degmada Dugsiyada Riverdale (Riverdale School District), waxaana loo adeegsan doonaa taageeridda waxbarashada ardayda Riverdale.

Maxay Degmada Dugsiyada Riverdale (Riverdale School District) ugu baahan tahay dakhliga Canshuurta Ikhtiyaariga ah ee Maxalliga ah?

Maalgelinnada dowladda lama aysan jaanqaadaynin kharashaadka saxda ah ee ku baxaaya waxbaridda ardayda. In kastoo deeqaha dowladda ay kordheen sannadihii ugu dambeeyay, lacagaha loo heli karo fasallada waxbarashada iyo adeegyada ardayda waxay ahayd mid isu-jaango'an marka loo eego sicir-bararka iyo kororka ku yimaaday kharashyada ku baxa hawlaha. Canshuurta Ikhtiyaariga ah ee Maxalliga ah waxay bixisaa dakhli muhiim ah oo lagu taageero shaqaalaha, barnaamijyada waxbarashada — oo ay ku jiraan Barnaamijka Baccalaureate-ka Caalamiga ah — iyo hawlaha degmada. Sanadka 2025, Niche waxay Riverdale gelisay kaalinta 1-aad ee Dugsiga Sare Dadweynaha iyo kaalinta 1-aad ee Dugsiga Dadweynaha K-8 ee gobolka Oregon.

- Sanad dugsiyeedka 2024-25, Riverdale wuxuu helay qiyaastii deeq dhan \$11,000 oo loo qoondeeyey arday walba ee maaliyadda dowladda, halka kharashka rasmiga ah ee ku baxay waxbaridda arday kasta ay ka badnayd \$19,000. Degmadu waxay sii wadeysaa heerkeeda waxbarashada iyo taageerada ee hadda jirta iyadoo loo maraayo Canshuurta Aftida loo qaaday isla markaana Maxalliga ah iyo taageerada Aasaasiga ah. Haddii aan la helin maalgelinta canshuurta, Degmadu waxay u baahan doontaa inay si weyn u dhinto adeegyada.

Ansixinta/Baasmarinta aftidan maxay sameyn doontaa?

Canshuurta waxay sii wadi doontaa maalgelinta ay codbixiyayaashu ansixiyeen 25-kii sano ee la soo dhaafay (2000, 2005, 2010, 2015, iyo 2020). Lacagaha canshuurta ee la qaado ma kordhin tobankii sano ee la soo dhaafay. Lacagaha Canshuurta Aftida loo qaaday ee Maxalliga ah waxay taageertaa sii haynta macallimiinta, barnaamijyada waxbarashada, iyo shaqaalaha. Waxay gacan ka geysataa sugidda barnaamijyada waxbarasho ee la bixiyo, oo ay ku jiraan fanka iyo muusiggada, waxayna taageertaa hawlaha guud. Haddii canshuurta aan la ansixin, Degmadu waxay u baahan doontaa inay yareeyso miisaaniyadda 2026–27 in ka badan \$1,000,000, taas oo lagu qiyaasay inay u dhiganto in shaqada laga joojiyo toddobo macalin ama in dugsiyada uu fasax ahaado qiyaastii 21 maalmood.



Sidee ayaa loo isticmaali doonaa lacagaha Canshuurta Aftida loo qaaday isla markaana Maxalliga ah?

Dakhliga Canshuurta Aftida loo qaaday isla markaana Maxalliga ah waxay qayb ka yihiin miisaaniyadda hawsha iyo taageerada:

- Joogtaynta shaqada macalimiinta iyo soo shaqaleysiinta kuwo khibrad sare leh
- Joogtaynta dugsi waxbarasho oo ay bulshadu la jaanqaadi karto
- Taageeridda barnaamijyada tacliinta iyo kobaca shaqsiyeed
- Agabyada waxbarashada iyo aasaasiyaadka kale
- Kaalmaatiga gacan ka geysta in hawlaha la fuliyo sida amniga iyo dayactiraadda dhismaha

Lacag intee dhan ayey canshuurtu soo xareyn doontaa?

Canshuurta waxaa lagu qiyaasayaa inay soo xareyso lacag dhan \$7,530,900 muddo shan sanno ah:

- 2026-27: \$1,418,300
- 2027-28: \$1,461,000
- 2028-29: \$1,505,400
- 2029-30: \$1,550,000
- 2030-31: \$1,596,200

Sidee ayay canshuurtani u saameyn doontaa canshuuraha aan bixiyo?

Canshuurtani shanta sanno soconaysa waxay beddeli doontaa cadada hadda la qaado ee canshuurta aftida loo qaaday ee Riverdale oo ah \$1.37 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay, iyadoo lasoo rogaayo canshuur cusub oo ku kacaysa \$1.67 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay, taasoo ka duwan \$0.30 halkii \$1,000 ee qiimaha guud hantida lagu qiimeeyay.

- Guri leh qiime lagu qiyaasay \$1,000,000, lacagaha la qiyaasayo in laga qaado waa \$1,670 sanadkii (\$139 bishii), qiyaastii waa mid ka badan \$300 sanadkiiba, ama mid ka badan \$25 bishii ee lacagaha canshuurta ee hadda la qaado. Lacagaha canshuurta ee sida rasmiga ah loo qaado way kala duwanaan kartaa iyadoo ku salaysan qiimaha hantida lagu qiimeeyay, dhaliilada Aftida Codbixinta 5, cadaadiska canshuuraha, iyo lacagaha canshuurta.

(Macluumaadkaan waxaa bixiyay: Chris Russo, Kormeeraha Guud, Degmada Dugsiyada Riverdale 51J (Riverdale School District 51J))

Qodob Loo Codeynaayo 26-264 Degmada Biyaha Burlington (Burlington Water District)

Canshuur Heer Deegan ah oo Soconaysa Shan sano oo Dadku Afti Ku Ansixinayaan, Lacagtaasna Loo Isticmaali Doono Hawlaha Ambalaasta Gurmada Degdegga ah Iyo Dab-Demiska.

SU'AAL:

Ma kula tahay in Degmadu ay oggolaan ayso inay dardargeliso canshuur cusub oo shan sano soconaysa oo ku qiimeysan in la qaado \$1.70 marwalba qiimaha hantida ay gaarto \$1,000 muddo shan sano ah laga bilaabo 2026–2027? Qodobkan loo codeynaayo wuxuu abuurayaa canshuuro maxalli ah oo cusub kuwaas oo keeni kara in canshuuraha hantidu ay kordhaan in ka badan saddex boqolkiiba.

DULUCDA/GUUDMARKA:

Canshuuraha waxaa loo isticmaali doonaa in lagu daboolo kharashaadka ay Degmada Biyaha Burlington (Burlington Water District) ku bixiso Waaxda Dab-damiska ee Magaalada Portland (City of Portland Fire Department) ee adeegyada degdegga ah (dab-damis iyo ambalaas) iyo in la joogteeyo sanduuq kayd ah oo loogu talagalay kororka kharashaadka mustaqbalka.

Qiyaasta wadarta lacageed ee la ururinayo sannad-maalayadeed walba waa:

\$81,961 sannadka 2026-2027
\$84,420 sannadka 2027-2028
\$86,953 sannadka 2028-2029
\$89,561 sannadka 2029-2030
\$92,248 sannadka 2030-2031

Qiimaha canshuurta ee lagu qiyaasay qodobkan loo codeynaayo waa QIYAAS KALIYA oo ku saleysan xogta ugu fiican ee laga heli karo qiimeeyaha degmada xilligii qiyaasta la sameeyay, waxaana laga yaabaa inuu ka tarjumayo saameynta dhimista lacag-bixinta hore, is-cadaadiska, iyo heerka ururinta. Hanti ku qiimaysan lacag dhan \$166,000.00, oo ah celceliska qiimaha la qiimeeyay ee degmada, waxa lagu qiyaasayaa inuu bixin doono ku dhawaad \$24 bishii oo ah canshuur hantiyeed oo dheeraad ah.

Bayaanka Sharaxaada ah

Degmada Biyaha Burlington (Burlington Water District), oo ah shirkad dowladeed oo degmo ah, waxay biyo iyo adeegyo degdeg ah siisaa qiyaastii 400 oo qof oo ku nool aagga Burlington ee Degmada Multnomah. Degmadu hadda waxay heshiis la leedahay Magaalada Portland (City of Portland) si ay ugu bixiso deggenyaasheeda iyo hantideeda adeegyada degdegga ah (dab-damis iyo ambalaas). Adeegyadan degdegga

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

ah waxaa lagu bixiyaa dakhliga canshuuraha laga soo ururiyo hantida ku dhex taalla xuduudaha Degmada Biyaha Burlington (Burlington Water District).

Doorashadan, Degmadu waxay idinka codsanaysaa inaad oggolaataan canshuur dheeraad ah oo dhan \$1.70 in laga qaado \$1,000 kiiba inta ay hantidu ku qiimeysantahay, si loo daboolo kharashaadka sii kordhaya ee ku baxa adeegyada gurmada degdegga ah. Kharashaadka ka yimaada Xafiiska Dab-damiska ee Magaalada Portland (City of Portland Fire Bureau) ayaa kordhay 10% sanadkii afartii sano ee la soo dhaafay, taas oo ku dhow labanlaabka celceliska koboca canshuuraha hantida. Dakhliga canshuurta hantida ee hadda jira ma sii dabooli karo kharashaadka adeegyada gurmada degdegga ah, sidoo kalena Degmadu ma haysato ilo kale maalgelineed oo ay ku bixiso kharashaadyada adeegyadaas.

Codsigan canshuurta ah wax saameyn ah kuma yeelanayo waajibaadka asaasiga ah ee Degmadu sida bixinta biyaha, sidoo kalena wax saameyn ah kuma yeelanayo qiimaha biyaha ee Degmada.

Ansixinta canshuurta waxay kaabi doontaa qiimaha joogtada ah ee hadda la qaado oo ah \$3.4269, waxaana la qiyaasayaa in ay celcelis ahaan soo saari doonto \$87,029 sanadkii muddo shan sano ah. Celceliska qiimaha lagu qiyaasay hantida ee ku jirta degmada canshuurteena waa \$166,000. Guri leh qiimaha celceliska ah, kharashka billaha ah ee hadda lagu bixiyo adeegyada gurmada degdegga ah waa \$47. Canshuurta aftida loo qaadayo ee heerka deegaanka ah isla markaana la codsanayo waxay ku dari doontaa \$24 bishii, taas oo ka dhigaysa wadarta kharashka celcelis ahaan \$71 bishii.

Canshuurahan waxaa ururiya Degmada Multnomah, waxaana loo isticmaali karaa oo keliya in lagu bixiyo adeegyada gurmada degdegga ah.

(Macluumaadkaan waxaa bixiyay: Richard T. Lovett, Guddoomiyaha Guddiga, Degmada Biyaha Burlington (Burlington Water District))